

# Aan ku ciyaarno usha Boomerang!


Prof. Yutaka Nishiyama  
Jaamacadda Dhaqaalaha ee Osaka (Osaka University of Economics), Jabbaan (Japan)  
nishiyama@osaka-ue.ac.jp

## Sida loo sameeyo

1. Soo qaado jeexa kartoon adag. (0.5-0.7mm).
2. Kartoonka dusha ka saar kaarta kaarboon (carbon paper); ka dibna kaarta kaarboonaha dusha ka saar qaabka usha boomerang.
3. Kaarta kaarboonaha dusheeda ku xariiq qaabka usha boomerang adiga oo qalin isticmaalaya. Ha illaawin in aad xariiqdo laynka dhibcaha ee geeska ku yaalla!
4. Calaamad ku sawir dhanka hore si aadan ugu qaldin dhanka dambe.
5. Si nadiif ah maqas ugu jar usha boomerang ee kartoonka ka samaysan.
6. Usha boomerang dul saar meel siman oona toosi haddii ay qalloocan tahay.
7. Mastarad dul saar laymanka dhibcaha. Adiga oo qalin isticmaalaya, si adag laba ama saddex jeer u xariiq laymanka dhibcaha si aad u fududayso laabidda geesaha.
8. Laalaabka buuraha xagal 10-30 digrii ah uga samee gees kaste. (Haddii aad gacan gurran tahay, samee laalaabka toggaa)

## Sida loo tuuro

1. Usha boomerang geeskiisa ku qabo suulkaaga iyo murdisadaada, isagoo uu dhankeeda hore dhinacaaga u jeedo (haddii aad gacan gurran tahay, usha boomerang u qabo isagoo dhankeeda dambe uu dhinacaaga u jeedo).
2. Usha boomerang kor u taag.
3. Marka aad tuurayso usha boomerang, xoogaa ka hor inta aadan sii dayn curcurtaada qallooci si aad u kordhiso wareegga usha boomerang.
4. Usha boomerang tuur marka ay ku toosan tahay indhahaaga, si aad gamuun oo kale tuuraysid.



## Qofwalbaaba waa karayaa! Aan wax aad u fiican tijaabinno.

### Sida ay u duusho

Usha boomerang waxay dadka midiglaha ah ugu wareegtaa si lid ku ah jihada saacadda dadka gacan guranna waxay ugu wareegtaa jihada saacadda, iyadoo halka indhaha ku toosan duusha. Masaafada ay duushaa waa 3-4 mitir, waqtiga duulitaankeeeduna waa 1-2 ilbiriqsi.

### Sida loo qabto

Waxay usha boomerang ku soo noqotaa sinnaan iyadoo aan taagnayn; labadaada gacmood 30cm kala durki dhakhsona u isticmaal baabbacada gacmahaaga si aad usha boomerang u qabato.

### Digniin!


Ulaха boomerang way khatar badnaan karaan! Dadka ha ku tuurin. Hubi in uusan qofba joogin meelaha kuu dhow marka aad tuurayso ulaha boomerang.

## Waa Maxay Sababta ay Usha Boomerang u soo Noqoto?

Usha boomerang way wareegtaa isla marka ay hawada duulayso iyadoo taagan. Inta ay wareegayso horena hawada u duulayso, geeska sare ee wareeggu waxuu ku socdaa xawaare ka sarreeya ka geeska hoose ee wareegga. Farqiga xawaaraha waxaa ka dhasha farqi ku yimaadda kicitaanka; geeska sare waxuu kacaa in ka badan geeska hoose. Maadaama ay usha boomerang xuddun ku wareegayso oo ay qaybta sare ee wareeggu ugu kacsan tahay, xoogga saarmaya ayaa usha boomerang ku khasbaya in ay dhinaca ay u duulayso ay beddesho oo ay bidixda u leexato, sidaas ayayna usha boomerang ku soo noqonaysaa. Waxay taasi la siman tahay sida fur wareegaya, kaasoo leexda si uusan u dhicin. Waxaa taas la yiraahdaa horusocodka wareegga (gyroscopic precession).

## Bogga internet'ka ee Ururka Usha Boomerang

Ururka Usha Boomerang ee Jabbaan (Japan Boomerang Association) (J B A)  
<http://www.jba-hp.jp/>  
Shabaqa Usha Boomerang ee Kansai (Kansai Boomerang Network) (K B N)  
<http://www.kbn3.com/>  
Ururka Usha Boomerang ee Maraykanka (United States Boomerang Association) (U S B A) <http://www.usba.org/>



Sawirka 1aad Macnaha bidix u leexashada midigta

Sawirka 2aad Xeerka gacanta